AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Degidda

Sida ugu dhaqsaha badan oo loo dego Australia waa barashada Ingiriisiga iyo helidda shaqada ama tababarka. Si kastaba ha ahaatee, u-guuridda waddan cusub waxay noqon kartaa mid wallaac badan waxaadna ka walwali kartaa xagga gurisiinta, shaqo helidda ama xirfadahaaga Ingiriisiga.

Australia waxay bixisaa adeegyo dowladeed oo kala duwan si ay kuu taageerto intaad ku jirto muddada degitaanka bilowga ah. Adeegyadan waxaa lagu bixiyaa ayadoo la marayo Barnaamijka Dejinta ee Banii-adamnimada (Humanitarian Settlement Program - HSP) oo ay maamusho lanta adeegga bulshada (Department of Social Services - DSS). Taageerada aad heli doonto waxay ku xirnaan doontaa baahiyaha qoyskaaga ama kuwa shaqsiyadaada.

Bilowga hore, waxaad helaysaa Garwadeen ah (qof shaqaale ah) ama qofkii ku-isboonsarey si ay kaaga caawiyaan inaad cagta saarto waddada madaxbannaanida. Waxay kugula kulmayaan Garoonka Dayaaradah waxayna ku geynayaan hoygaaga.

Inkastoo safarka qof kasta kala duwanaan doono, haddana waxaa jira waxyaalo ay tahay in la sameeyo dhowrka asbuuc ee ugu horreya imaansha Australia.

U-adeegso liiskan-hubinta inuu kuu noqdo tilmaame si aad u aragto waxaad u baahan tahay inaad samayso iyo markaad u baahan tahay inaad samayso. Qofkaaga caseworker-ka ah ayaa kugu caawin doona mid kasta oo tallaabooyinkan ka mid ah.

## Asbuuca kow

- ☐ Imow Garoonka Diyaaradaha/madaarka Australia – qofkii caseworkerkaaga ama proposer-kaaga ayaa kuugu imaanaya
- ☐ Imow hoygaaga
- ☐ Furo akoonka bangiga – baro sida lacagta loo-dhigto/loogala soo baxo
- ☐ Iska diiwaangeli Centrelink – si aad u hesho lacag-bixinnada taageerada ah
- ☐ Iska diiwaangeli Medicare – si aad u hesho daryeelka caafimaad
- ☐ Hel Lambarkaaga Faylka Canshuurta (Tax File Number - TFN) – si aad u raadsato shaqo.

## Labada-asbuuca ee ugu horreeya

- ☐ Ku-qor (Ka diiwaangeli) carruurtaada dugsiga
- ☐ Baro deriskaaga cusub. Bar-tilmaamayso xaruunta dukaamaysiga kuugu dhow, supermarket-ka, isbitaalka, maktabadda iyo xiriirada gaadiidka dadweynaha
- ☐ Hel dhaqtarka degaanka si loo helo daryeelka caafimaad ee qoyskaaga.

## Lixda bilood ee ugu horreeya

- ☐ Samee qiimaynta caafimaadka
- ☐ Iska diiwaangeli Barnaamijka Waxbaarashada Dadka Waaweyn (Adult Migrant English Program - AMEP) si aad u barato Ingiriisiga
- ☐ Haddii gurigaaga kowaad uu yahay mid ku-meel-gaar ah waxaad u baahan doontaa inaad raadiso hoy muddo dheer ah
- ☐ Bilow raadinta shaqo ama tababar.

Dhammaan dadka ku nool Australia waxay yeeli karaan inay ukala safraan oo ukala guuraan si xor ah dowlad-goboleedyada iyo taritooriyada dhexdooda. Ka-guuridda meeshii dejintaada hore waxay noqon kartaa inaad weyso heliddii adeegyada taageerada qaarkood aad ku heli jirtey Barnaamijka HSP. Kala hadal caseworker-kaaga oo ka codso talooyinkooda ka hor intaadan go'aansan inaad guurto.

Australia waa waddan juquraafi ahaan ballaaran, hase ahaatee dadka waddanka degani si fudud bay u wada-xiriiraan ayagoo maraya isgaarsiinta tayada sare iyo isku-xirada gaadiidka. Dadka Australia badanaa waxay safraan masaafooyin dhaadheer si ay usoo booqdaan saaxiibadooda iyo qoyskooda, badanaa maalmaha weekends-ka (Sabtida & Axadda) ama inta lagu jiro muddada fasaxyada. Uma baahnid inaad baddesho halkaad ku nooshahay si aad saaxiibadaada iyo qoyskaaga usoo aragto; taas baddelkeeda waxaad tixgelin kartaa inaad booqato adigoo adeegsanaya gaadiidka dadweynaha sida basaska ama tareennada.

## Magacyada iyo xiriirada muhiimka ah

### Qofka-shaqaalaha ah

Haddii aad haysato qaybaha visa a subclass 200, 201, 203 or 204 visa qofka caseworker ah ayaa laguu qoondaynayaa si uu kaaga caawiyo inaad degto. Caseworkeradu waa shaqaale haya'deed kuwaas oo adeegyo bixiya ayadoo la raacayo Barnaamijka HSP. Caseworkeradaadu waxay kugula kulmi doonaan Garoonka Diyaaradaha waxay noqonayaan shaqsiga ku taageeraya inta aad degayso Australia. Mar kasta kulama joogi karaan sidaas darteed waxaa muhiim ah inaad hanato safarka degitaankaaga. Weydii su'aalaha aad qabto. Waxaa jira dad badan oo ka shaqeeya haya'daha dowladda ee kala duwan kuwaas oo ka masuul ah inay caawiyaan dadweynaha Australia – taas macnaheeduna waa adiga.

Haddii aad haysato qaybaha fiisada subclass 202 visa, qofkii ku isboonsaray proposerkaaga ayaa ogolaaday inuu ku taageero kaana caawiyo inaad degto Australia. Qofka proposerka ah badanaa waa xubin qoyska, saaxiib ama haya'dda bulshada ah. Inkastoo aad leedahay qofka proposerka ah kaas oo ka masuula inuu kaa caawiyo inaad degto, haddana qofka HSP Garwadeen (caseworker) ah ayaa soo wici doona qofka damiinka kaa ah (proposerkaaga) waqtina u sameynaya inuu kuu yimaado si loo go'aamiyo haddii uu wax taageero ah loo baahan yahay.

### Tilmaan-siinta HSP

Tilmaan-siinta HSP waxay ku dhisan tahay macluumaadka laga helo AUSCO. Barnaamijku wuxuu bixiyaa kulamada fasalka, dalxiis-gaaban iyo Dhaqdhaqaaq/nashaadyo ama waxqabad si ay kaaga caawiyaan inaad macluumaadkaas ka hirgeliso bulshadaada cusub iyo magaaladaada.

Tilmaan-siinta HSP waa hab fiican oo su'aalahaaga looga jawaabayo iyo sidoo kale aad wax ka baran karto dadka kale oo aad isku duruufta tihiin intii aad ka heshoba aqoon la-taaban karo qaybaha sida gurisiinta, miisaaniyad-samaynta, iwm. Tusaale ahaan, waxaad wax ka baran kartaa wax ku saabsan dukaamaysiga iyo miisaaniyad-samaynta ayadoo qof ku tusayo dukaamada ugu raqiisan qaybaha degaankaaga. Waxaad awoodi doontaa inaad la kulanto booliiska iyo qareenada si ay kaaga caawiyaan inaad wax badan ka barato Sharciyada Australia.

Tilmaan-siinta HSP waxay ku siinaysaa xirfadaha iyo aqoonta la-taaban karo si ay kaaga caawiso noloshaada cusub ee Australia. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.dss.gov.au oo ka baar 'Humanitarian Settlement Program'.

### Adeegga turjumaanka ee TIS National

Haddii aad u baahato turjumaan, fadlan ka wac Adeegga Fasiraadda iyo Turjumidda (Translating and Interpreting Service - TIS National) taleefanka 13 1450. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.tisnational.gov.au/en/Non-English-speakers



### Centrelink
Waxaad xaq u yeelan kartaa inaad hesho lacag-bixinada Centrelink labadii asbuucba mar. Haddii aad xaq u leedahay, Centrelink waxay lacagta kuugu soo shubaysaa akoonka bangigaaga. Qadarka lacagta aad hesho wuu ka duwanaan karaa qadarka uu qof kale helayo. Centrelink waxay ka shaqayn doontaa intay le'egtahay lacagta lagu siinayo taas oo ku salaysan xaaladda shaqsinimadaada. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.humanservices.gov.au/customer/dhs/centrelink

### Marnaamjka ingiriiska ee muhaajirka weyn (AMEP)
Waxaad xaq u yeelan kartaa inaad Ingiriisiga ka barato AMEP. AMEP waxay bixisaa 510 saacadood oo ah waxbarasho luqadda Ingiriisiga oo lacag la'aan ah. Si aad u hesho goobta adeeg-bixiyaha AMEP ee deegaankaaga, ka eeg www.education.gov.au/amep ama ka wac khadka macluumaadka Australia ee Xirfad-siinta taleefanka 13 3873 meel kasta oo Australia ah qiimaha wicitaanka degaanka.

### Lambarka Faylka Canshuurta (Tax File Number - TFN)
Si aad u hesho manfacyada Centrelink ama inaad shaqayso, waxaad u baahan tahay Lambarka Faylka Canshuurta. Kaasi waa lambar gaar ah oo ay ku siiso adiga Xafiiska Canshuuraha Australia (Australian Taxation Office). Waxay kugu caawinaysaa inaad codsato caawimaadda dakhliga ama manfacyada kale. Shaqaalaha Centrelink waxay kaa caawinayaan helidda TFN. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.ato.gov.au

### Medicare
Medicare waxay bixisaa caawimaad xaga qarashka ee daryeelka daawada qaarkeed. Qofka ku isboonsaray ama caseworker-ka ayaa ku tusi doona xarunta Adeegga Medicare ee kuugu dhow, isbitaalka, xafiiska dhaqtarka iyo adeegyada caafimaadka ee kale. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.humanservices.gov.au/medicare

### Tallaalka
Waxaad kaloo u baahan tahay inaad marto baaritaanka caafimaadka inkastoo aysan qasab ahayn, waxaa aad loogu talinayaa in carruurtaadu qaataan tallaalka. Dowlad-goboleedyada iyo taritooriyadda qaarkood waxay codsadaan diiwaanka heerka tallaalka ee ilmaha si loogu soo gudbiyo markii ilmahu tagayo xanaanaada ilmaha ama bilaabayo dugsiga. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg www.health.gov.au







Boggan si ula kac ah ayaa loo baneeyey

*Qaybta dib loo eegay (April 2018)*

Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee Adeegyada Bulshada

IOM • OIM